

DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA GAROOWE
DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED
MASHRUUCA SOO KABASHADA DHISMAHA MAGAALADA
SOMALI URBAN RESILIENCE PROJECT PUNTLAND

WARGELIN DAD-WEYNE

Qaab-dhismeedka Maareynta Deegaanka iyo Bulshada (QMD&B) waa agab uu u baahan yahay Bangiga Adduunku si Mashruuca Soo kabashada Magaalooyinka Soomaaliyeed (MSMS) uu u kobciyo soo kabashada magaalooyinka la doortay: b) kor u qaadida maamulka iyo awooda dawladdaha hoose, si ay u bixiyaan kaabayaal iyo adeegyo la gaarsiinayo heerka hoose ee nidaamka dawliga ah; t) taageerida maalgelinta kaabayaasha iyo adeegyada; j) taageerida qorshaha magaalooyinka ee mustaqbalka; x) abuurida fursado ilo dakhli gaar ahaan dadka saboolka ah iyo kuwa barakaca ah; kh) kordhinta isku-xidhka bulshada iyada oo laga taageerayo kaabayaasha taas oo faa'iido u leh bulshooyinka martida loo yahay iyo kuwa barakacayaasha ah iyada oo loo marayo hannaan go'aan qaadasho loo dhan yahay.

MSMS waa barnaamij heer qaran ah oo lagu kabayo magaalooyinka kaas oo ujeedkiisu yahay tijaabo iyada oo la isticmaalayo nidaamka waddanka gaar ahaan xoojinta awoodaha dawladdaha hoose. Hawlaha ugu horeeya waxay ka bilaaban doonaan magaalooyinka Garoowe iyo Muqdisho sababtoo ah u diyaargarowga ay sameeyeen. Maalgelin dheeri ayaa loo qoondeeyay magaalooyinka Kismaayo iyo Baydhabo oo dib kaga soo biiri doona mashruuca, maadaama ay yihiin kuwo martigelinaya muwaadiniin dalka dib ugu soo noqday iyo barakacayaal aad u tiro badan. Mashruucani wuxuu noqon doonaa mid balaaran dhan juqraafiyadeed marka lacag dheeraad ah la helo. Bixinta maalgashiga kaabayaasha iyada oo loo marayo dawladdaha hoose gaar ahaan mashruucan ma noqon doono tijaabin qaabka maamul baahinta adeeg bixinta oo kaliya, balse waxa uu xoojin doonaa awooda adeeg bixinta dawladdaha hoose mustaqbalka dheer. Hirgelinta mashruuca waxaa taageeri doona QMD&B.

QMD&B waa agab uu u baahan ahay Bangiga Adduunku mashaariicda uu maalgelinayo taas oo loogu talagalay waddanka uu maalgelinayo in uu ilaaliyo deegaanka iyo dadka ku nool goobta mashruucu saameynayo. QMD&B waxa uu tusmeynayaa mabaadiida iyo nidaamyada la raaci dooni si loo hubiyo hawlaha mashruucu ay waafaqsan yihiin sharciyada dhulka iyo deegaanka ee Soomaaliyeed iyo siyaasadaha ilaalinta ee Bangiga Adduunka. QMD&B waxaa uu aragti guud ka bixinayaa xaaladaha deegaan ee ka jira goobaha mashruuca, cadeynta saameynta ka dhalan karta hirgelinta hawlaha mashruuca iyo soo jeedinta tallaabooyin guud oo lagu yareyn karo, habaynta hay'adaha iyo dhisidda awooda lagama maarmaanka u ah unugyada fulinaya ay u baahan yihiin si ay u gutaan shaqooyinkooda, waqtiga suurtagalka ah iyo miisaaniyadda lagu qiyaasay. Macluumaadka ku jira QMD&B wuxuu noqon doonaa saldhigga doorashada deegaan gaar ah ee mashaariicda dhismaha magaalooyinka taas oo la qaban doono qiimaynta saamaynta deegaanka inta lagu jiro marxaladda faahfaahsan ee naqshada.

Mashruucu waxa uu: b) bixinayaa baaritaan bilaw ah qeybinta mashaariicda u qalma; t) qeexayaa qiimeynta khaaska loo baahan yahay si loo sugo oo loo sii wado; j) tilmaamayaa baaxadda shaqada la qaban doono ee mashruuc walba; x) qeexayaa qaabaynta hay'adaha fulinaya Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada (QMD&B) iyo dhisida awooda ay u baahan yihiin hay'adaha ay quseyso si ay doorkooda u qaataan; iyo kh) qiyaasida miisaaniyada loo baahan yahay si qorshahaas loo fuliyo.

Hoos waxaa ku cad labada qeybood ee mashruucan ka kooban yahay, kaas oo socon doona 36 bilood: b) kaabayaasha magaalada Garoowe; iyo t) jawaab celinta xaaladaha deg dega ah. Hawlaha laga qabanayo Garoowe waxay ku cad yihiin hoose.

Kaabayaasha magaalada Garoowe: qayb-hoosaadkani waxa uu maalgelin doonaa afar waddo oo wadarta dherarkoodu dhan yahay 4.9 kilomitir. Wejigii kowaad ee mashruucan waxaa la diyaariyey daraasado suurtagal ah iyo naqshado injineernimo horudhac ah ee maalgelinta 19 waddoooyin iyo labo buundo. Sababo maaliyadeed awgood, si kastaba ha ahaatee, 3 milyan oo Doolar oo ay ku jirto kharashka kormeerka ayaa loo hayaa in lagu dayactiro afar ka mid ah 19 waddooyin. Waddooyinkan ayaa mudnaanta la siin doonaa iyada oo lagu saleynayo xiriirinta bulshada saboolka ah iyo barakacayaasha iyo xarumaha muhiimka ah ee dhaqan-dhaqaale, heerarka sare ee dhaqaalaha ka soo noqonaya iyo saami faa'iido/qiimo sare leh. Waddooyinka gaarka ah ee mashruucu maalgelin doono waxaa laga yaabaa in la baddalo sababtuna tahay miisaaniyad, amni iyo tixgelinta dhaqaalaha siyaasadeed.

Dhisida Awooda: qaybtani waxay caawin doontaa dhisida awooda Mamulka Fulinta Mashruuca (MFM) ee Dawladda Hoose iyada oo diirada la saarayo maamulka dhaqaalaha, wax soo iibsiga iyo ilaalinta deegaanka iyo bulshada iyo injineernimada. Kuwani waa meelaha muhiimka u ah hubinta in kaabayaal talo leh la fuliyey si ay ku dheehan tahay habdhaqan hufan oo lala xisaabtami karo. MFM waa qeyb ka mid ah Dawladda Hoose, horumarinta kartida shaqadoodana waxaa ka turjumi doontaa ku wareejinta qoonta shaqaalaha degmada oo dhan. Xoojinta awooda waxay ku dhan tahay qiimeyntii horay loogu sameeyay Dawladda Hoose.

Hawlgalka iyo Dayactirka: Qaybtani waxay maalgelin doontaa horumarinta qorshayaasha hawlgalka iyo dayactirka waddada iyo kaabayaasha kale ee mashruucu maalgeliyey iyo taageerida Guddiyada Daryeelka ee heer degmo. Guddiyadaas waxaa loo sameeyay barnaamijka wadajirka ah ee dawladdaha hoose ee Qaramada Midoobay ay maalgelinayaan, waxayna ka kooban yihiin xubno matalaya qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin haween, dhalinyaro, barakacayaal, wadaadada iyo xubnaha ururada ganacsatada. Mashruucani waxa uu dib-u-eegid ku sameynayaa guddiyada si loo hubiyo in loo dhan yahay, waxaana la sii xoojin doonaa sidii guddiyadu ay doorkooda u qaadan lahaayeen iyaga oo ku wargelinaya dawladda hoose daryeelka waddooyinku u baahan yihiin iyo abaabulidda dadweynaha in ay ka qaybqaataan daryeelka joogtada ah ee loo baahan yahay. Sidoo kale qaybtani waxay maalgelin doontaa tababarida unugyada Dawladda Hoose masuulka uga ah dayactirka kaabayaasha, caawinta Dawladda Hoose Garoowe in ay dejiso, horumarisana tilmaamaha geedi socodka dhismaha iyo ka koobnaanshaha Guddiyada Dayactirka, iyo taageerida iskuxir wanaagsan ee hawlaha Guddiyada. Dayactirka dhabta ah ee waddooyinka waxaa maalgelin doonta Dawladda Hoose mashruucuna dhaqaale uma qoondayn sababta oo ah dhaqaalaha la hayo oo xaddidan.

Maamulka Mashruuca: Ugu dambeytii, qaybtani waxay maalgelin doontaa kharashka maareynta mashruuca sida shaqaalaha MFM ee Garoowe, hanti-dhowrka, fulinta cabashooyinka iyo habka jawaab celinta la xiriira hawlaha mashruuca, dabagalka iyo qiimeynta hawlaha mashruuca. Aqoonsiga in qaybaha kala duwan ee mashruucu ay noqon karaan diiradda khilaafaad maxali ah, farsameynta cabashooyinka waxaa ku jiri doonta sameynta Guddiyada Xalinta Cabashooyinka ee heer degmo waxaa lagu darayaa habka mashruuca. Farsameynta cabashooyinka waxaa si faahfaahsan loogu qeexi doonaa habraaca fulinta mashruuca.

Mashruuca waxaa loo cayimay Qaybta Deegaanka B maadaama saameyntiisu ay tahay mid la qiyaasi karo, dabeecado ku meel gaar ah leh. Dib-u-eegis ku saabsan sharraxaadda guud ee mashruuca ee la xiriirtaa xaaladaha deegaan ee hadda ka jira, waxaa horay loo go'aamin karaa in waxyeelooyinka soo socda ay ka dhalan karaan fulinta mashruuca: b) iibin dhul iyo dib u dejin; t) kordhinta dikhowda hawada; j) kordhinta heerka dhawaaqa; x) luminta kala duwaanshaha bay'ada; kh) isbadel heerka biyaha goobta ku yimaada kaas oo keeni karta daadad; d) sii xumeynta oogada sare iyo tayada biyaha dhulka oo ay sababi karto haddii aan si habboon loo ilaalin qashinka guryaha; r) arrimaha caafimaadka dadweynaha ee la xiriirta uruurinta aan habooneyn ee qashinka guryaha iyo kan shaqaalaha dhismaha; s) khasaaro hanti dhaqameed ama mid taariikheed; sh) suurtogalnimo khilaaf bulsheed. Waxaa kale oo jira saameyn wanaagsan ee mashruucu leeyahay waxaana ka mid ah: b) yareynta kharashka dayactirka gaadiidka sababtoo ah waddooyinka xaaladahooda oo la hagaajiyey; t) kor u kac ku yimaada dakhliga qoyska sababtoo ah waxaa yaraanaya kharashkii kaga bixi jirey kirada baabuurta; j) agabka ama badeecada oo waqti yar lagu gaarsiin karo suuqyada; x) dadka oo habab kala duwan ku gaari kara goobaha adeegyada bixiya sida dugsiyada, cisbitaalada, hay'adaha dawliga ah IWM.

Horey waxaan u sheegnay in saameynta xun la maareyn karo iyada oo loo marayo hirgelinta hababka injineernimada caadiga ah ee ku jira qorshaha ilaalinta Deegaanka iyo Bulshada taas oo qayb ka "Baaxada Shaqada" qandaraaslaha dhismayaasha.

Ka qaybqaadashada dadweynaha ayaa mudnaan la siiyey si: b) daneeyayaasha mashruuca loogu soo bandhigo macluumaad ku saabsan mashruuca, qaybihiisa, saameyntiisa iyo tallaabooyinka yaraynta, waqtiga iyo farsamada cabashooyinka; t) raadinta fikradaha iyo faalooyinka daneeyayaasha ee ku aadan mashruuca iyo qaybihiisa; x) isku raacida aragtida iyo go'aamada ka qaybgalayaasha ee mashruuca iyo dhisida awooda ay u baahan yihiin; iyo kh) keenida macluumaad kale ee ku haboon fulinta mashruuca.

Mulkiilaha mashruuca waa Dawladda Hoose Garowe. Qorsheynta iyo fulinta joogtada ah ee mashruuca waxaa ka shaqeyn doona MFM iyaga oo diyaarin doona Qorshaha ilaalinta Deeganka iyo Bulshada, dabagalka iyo qiimeynt qorshayaha, ka qaybgalka kulamada la tashiga dadweynaha, IWM. Wasaaradaha iyo Dawladda Hoose ayaa ku lug yeelan doona qorsheynta, dib-u-eegista iyo ansixinta dhammaan qiimeynta iyo qorshaha iyo warbixinada deegaanka iyo bulshada. Bangiga Adduunka waxa uu kormeerayaa fulinta mashruuca iyo waafajinta shuruudaha. Dib-u-eegis mashruuca oo xiliyeysan ayaa shaqaalaha Bangigu ku imaan doonaan si loo ansixiyo warbixinada dabagalka ay MFM u gudbisay Bangiga.

Waxaan idiin rajeynaynaa guul iyo barwaaqo idanka Ilaahey.

Mahadsanidiin,

Wada Shaqeyn Wacan,